



## Magaalada Seattle Aragtida Guud ee Hawl-Bilawga Adeegga Macmiilka

Hawsha ugu muhiimsan ee Magaalada Seattle waxa weeye in ay siiso adeegyo aasaas ah macamiisheeda – ee ka mid ah dadka Seattle. Macamiisheedu waxay xaq u leeyihiin in ay helaan adeegyo aasaas oo dhakhso ah, hawl qabad fiican leh oo si fudud loo heli karo – laga bilaabo biyaha iyo quwadda illaa waddooyinka iyo nabadgelyada dadweynaha. Sannad kasta Magaaladu waxay ka heshaa macmiisheeda ee caawimaad u baahan ilaa 10 milyan oo wacid taleefoonno iyo malaayiin waraaqo iyo e-mail loo soo diro. Codsiyada qaar ka mid ah si wanaagsan baa wax looga qabtaa, hase yeeshee qaar badan ayaan wax laga qaban.

### Dhibaataada

Nidaamka hadda ka jira Seattle waa mid si aanan loo baahnayn wax u jawaabin iyo caga jiid leh. Macmiisha magaalada saddex waxa baa hor taagan:

- **Ma yaqaanaan lambarka ay waci lahaayeen.** *Iyadoo 1,000 lambar wax ka badan ay taxan yihiin bogagga buluugga ah, macmiilladu badanaaba waxay ku kaliftaa in ay sida ugu wanaagsan maleeyaan, oo iyagoo wareersan eega taleefoonno badan, ama hela farriimaha loo duubo taleefonnada aan laga jawaabin.*
- **Ma jiro ballan-qaad in la caawin doono.** *Habkan aanan meel dhexe laga xukumin, macmiilladu ma haystaan ballan-qaad inuu qofka shaqaynayo codsiyadooda oo hubinaya in dhibaataadooda la xalliyo.*
- **Ma jirto xil-qaadid marka ay Magaaladu guul-darraysato.** *Marka aanay jirin hab raad-raacin hawl-qabadka, Magaaladu ma garanayso meesha ay ku guulaysanayso, meesha ay ku guul-darraysanayso, iyo sida ay hawl fiican u qaban karto.*

Iyadoo ujeeddadu tahay bixinta adeegga macmiil ee ugu wanaagsan Magaaladu waa inay:

- **Hagaajisaa awood-isticmaalidda.** *Magaaladu waa inay dhammaan ka dhigtaa adeegyada Magaalada in si sahlan loo heli karo oo ay awood-isticmaali karaan dhammaan macmiiladeedda.*
- **Hagaajisaa fiicnaanta wax-qabashada.** *Magaaladu waa in ay si hawl-qabad fiican u xallisa codsiyada adeegga, oo isla markaana raad-raacaan meesha ay marayaan oo macmiilladana war geliyaan.*
- **Hagaajisaa hawl-qabashada iyo xil-qaadidda.** *Magaaladu waa inay hagaajisaa hawl-qabashada iyo xil-qaadidda iyadoo ururinaysa oo isla markaana warbixinaysa hab-xisaabeedka adeegga oo u sheegaysana macmiisheeda waxa ay Magaaladu ka qaban karto codsigooda.*

Natiijadii tiro-koobka Adeegga Macmiilka ee la siidaayey Ogosto 2007 waxay tusaysa in ku dhow boqol-kiiba 90 dadka deggan ay latahay ra'yi fiican in Magaalada Seattle lahaato hal taleefon lambar oo loogu tala-galay waxyaabaha aan deg-degga ahayn. Intaa waxa dheer, afartii dalool seddex dadka daggan waxa ay latahay isticmaalka lacagta cashuurtooda in habkan oo kale lagu hirgeliyo.

### Sharciga Xuquuqaha Macmiilka

- Iyadoo aan tix-gelinayno habkan ee seddexda-tallaabo ah oo lagu bixinayo adeegga macmiil ee tayada sare leh, Magaaladu waa inay si cad u dhigtaa heerarka iyo waxyaabaha laga filayo, oo ku salaysan mabaad'idan hagaya ee soo socda: **Sahlan oo la fahmi karo.** *Shayada iyo adeegyada Magaaladu bixiso waa in si sahlan loo heli karo oo loona isticmaali karo.*
- **Jawaabi og.** *Shaqaalaha Magaaladu waa inay caawimaad diyaar u yihiin, oo macmiillada ku xiraan kuwii kale ee caawini kara haddii aynan iyagu caawin karin.*
- **Xaq-ah.** *Waa in aynan jirin waxyaabo ku gudban oo ah dhaqaale, bulsho ama dhaqan isticmaalidda shayada iyo adeegyada ay Magaaladu bixiso.*
- **Natiijooyin u Hanuunsan.** *Macmiilladu waa inay helaan natiijooyin, aan ahayn hannaanka hawl socodka oo keliya.* Mabaad'idan waxa si gaaban lagu sharraxayaa Sharciga Xuquuqaha Macmiilka.

### Tallaabada Xigta

- Magaaladu waxay ka dalban doonta macmiillada ra'iyada dhiibasho – shakhsi ahaan ama shabakadda internetka – oo ku saabsan wixii lagu dari lahaa Sharciga Xuquuqaha Macmiilka:
  - Maxay adiga ku la tahay micnaha adeegga wanaagsan ee macmiilka?
  - Maxay ku la tahay in ay ku jirto Sharciyadeenna ee Xuquuqaha Macmiilka?

**Wixii war dheeraad ah eek u saabsan mashruucan, la xirii Xafiiska Adeegga Macmiilka ee (206)684-CITY (2489) ama booqo Shabakaddan internetka: [www.seattle.gov/mayor/issues/BillOfRights](http://www.seattle.gov/mayor/issues/BillOfRights)**